

Loogu talagalay dadka bukaanka ah ee u qaata Xarelto® xinjiraha dhiigga ee gala lugta iyo/ama sambabka

Qoraalkan macluumaadku wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan xidid dhiig xinjir dhiig arooriye (venous thromboembolism), oo ah kelmad ay ka mid yihiin labaduba xinjir ku jirta xidid gunta-dheer (xinjir ku jirta xidid weyn) iyo xinjirta ku jirta sambabka. Markay tahay xinjirta ku jirta xididka gunta dheer, xinjiraha dhiigga ayaa ku samaysma xididdada gunta dheer ee lugahaa ama misigta. Markay tahay xinjirta sambabka, qayb ama giddii xinjirta ayaa soo dabacda oo soo go'ada oo waxay raacdaa qulqulka dhiigga oo ay tagtaa sambabada. Qoraalkan macluumaad ayaa waliba soo bandhigaya macluumaad ku saabsan ku dawaynta Xarelto – dawo yaraysa halista soo noqnoqodka leh ee ka yimaad xinjirta xididka dhiigga ee gunta dheer iyo xinjirta sambabaka.

Waa maxay xinjirta dhiiggu?

Xinjirta dhiigga ayaa ka samaysan dhiig adkaaday (xarkakay). Waa la kala soocaa xinjiraha dhiigga ku samaysma xididdada iyo xinjiraha dhiigga ku jira halbowleyaasha. Waxay ka kooban yihiin walax isku mid ah (dhiig xarkakay), laakiin waxay keenaan cudurro gabi ahaanba kala duwan oo waxa lagu daweeysa siyaabo kala duwan. Tusaale ahaan, xinjiraha dhiig ee ku samaysma halbowleyaasha ayaa keeni kara faalig ama wadno qabad.

Qoraalkan macluumaad wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan xinjiraha dhiig ee xididka – xinjirta ku jirta xididka dhiigga gunta-dheer iyo xinjirta sambabka.

Waa maxay xinjiraha dhiig ee xididka, xinjirta ku jirta xididka gunta-dheer iyo xinjirta sambabka?

Xinjiraha dhiigga ee xididka, ee loo yaqaan venous thromboemboli, ayaa ku samaysma xididdada dhiigga. Xididdada dhiigga ayaa ah marinnaada dhiigga ee dib ugu qaada dhiigga ku liita-oksijiinta wadnaha. Xinjiraha xididka dhiigga ayaa badanaa ku samaysma lugaha ama miskaha. Xinjiraha xididka dhiigga ee ku yaal xididdada waawayn een gunta dheer ee lugaha ama miskaha ayaa loo yaqaan xinjirta ku jirta xididka gunta-dheer.

Xinjirta ku jirta xididka gunta-dheer keeni karta xinjirta sambabka (xinjirow dhiig oo ku jira sambabada), oo ah xaalad aad u daran. Markay tahay xinjirta sambabka, qayb ama giddii xinjirta ayaa soo dabacda oo soo go'ada oo waxay raacdaa qulqulka dhiigga oo ay tagtaa sambabada. Xinjirta sambabka ayaa is-hortaagta ama joojisa ku qulqulka dhiigga ee sambabada joojiyo, taas oo ay ku adagto inuu qofku neefsato. Xinjirta sambabka ayaa noqon karta inay nafta halis galiso. Waa inaad isla markaaba raadsato daryeel caafimaad haddii sabab la'aan neeftu kuugu gaabato, ayay kugu adkaato inaad neefsato ama laabtu ku xanuunto.

Maxaa sababa xidid dhiigga xinjirta arooriya?

Xidid dhiig xinjir arooriyaha ayaa yeelan kara waxyaabo badan oo sababa.

Waa kuwan tusaalooyin ka mid ah sababaha keena ee kordhiya halista: dhiig xinjirow hore, xinjir dhiig oo isku gudubta xidid dhiig ku yaal sambabka, xididda dhiigga ee maqaarka ka muuqada (varicose veins), cudur kale oo daran, sariir jiifka u badnida, taariikhda qoyska oo u jajaban, uurka iyo da'ada aadka u weyn. Duullimaadyada fogaanta dheer, hababka qalliinka, dhaawaca xididdada dhiigga ama ka hortagga uurka ee afka laga qaato (estiroojin) ama arrimaha kale ee kordhin kara halista xinjirta ku jirta xididka gunta-dheer.

Maxaa loogu dawayeea xidid dhiigga xinjirta dhiigga arooriya dawada dhiigga khafiifisa?

Haddii aad qabto xidid dhiig xinjirta dhiigga arooriya waxaad qaadan doontaa dawooyin dhiigga khafiifiya oo kaa caawinaya inay milanto xinjirta dhiiggu oo ay yaraato halista samaysanka xinjiro dhiig oo cusub. Dawayntu ayaa waliba yaraynaysa halista ka iman karta xinjirta sambabka, taas oo ah xaalad aad u xun.

Waxa intaa u dheer ku dawaynta dhiig khafiifiyayaasha, dadka bukaanka ah ee qaba dhiig-xinjirowga lugta ah waxa laga yaabaa in sidoo kale u baahdaan sheyo la gashado oo lugaha taagera, oo waliba kale loo yaqaan sharabaaddo ama cago-gashi gijjinta.

Xarelto

Xarelto waxay ka tirsan tahay qayb ka mid ah dawooyinka loo yaqaan xinjirowga lidka, tussaale ahaan, dawooyinka dhiigga khafiifiya. Xarelto waxay yaraysaa kartida uu dhiiggu ku xinjiroobo, taas oo ka hortagaysa samaysa xinjiraha dhiigga. Waxayna ku hawlgashaa iyada oo is hortaagta walax ku jirata dhiigaa – walaxda xinjirowga Xa.

Xarelto waa daawo dhakhtar qoro.

Ku dawaynta Xarelto

Muddada dawayntu ay qaadata

Ku dawaynta Xarelto waa inay sii socotaa wali illaa inta u dhakhtarkaagu dareensan yahay inay jirto halis samaysmid cinjiro cusub oo dhiig. Waa muhiim in aadan joojin ka dawayntaada adiga oo aan marka hore la hadlin dhakhtarkaaga.

Sida loo qaado Xarelto

Isku day inaad qaadata kiniika isla waqti isku mid ah maalin kasta si ay kuugu fududaato inaad xusuusato. Waa muhiim in lagu qaato Xarelto cuntada si loo helo waxtarka ugu wanaagsan.

Cuntada iyo cabbitaanka

Waxaad cuni kartaa waxaad rabto; khamri cabbitaanka oo aan la isku badin saamayn kuma laha dawaynta.

Qiyaasta dawada

Inta lagu guda jiro saddexda usbuuc ee ugu horreeya dawaynta ayaad qaadan doontaa Xarelto 15 mg laba jeer maalintii. Ka dibna waxaad qaadan doontaa Xarelto 20 mg maalintii hal jeer muddada dawaynta.

Haddii aad ilowdo inaad qaadata kiniinka

- ♦ Inta lagu guda jiro saddexda usbuuc ee ugu horreeya dawaynta ayaad qaadan doontaa Xarelto 15 mg laba jeer maalintii iyada oo lagu qaato qurraacda iyo cashada. Haddii aad ilowdo inaad qaadata ha qiyaas dawo, qaado kiniika sida ugu dhaqsaha badan ee aad u xusuusto si aad u hubiso wadar qaadasho maalinle ah oo 30 mg Xarelto
- ♦ Ugu dambaynta, kaddib markii saddexda toddobaad ee ugu horreeya dawaynta, waxaad ku qaadan doontaa cuntada 20 mg Xarelto maalintii hal jeer. Haddii aad ilowdo hal qiaas dawo, qaado kiniinka sida ugu dhaqsaha badan ee aad u xusuusato

Haddii aad ilowdo maalin dhan, ku sii wado qiyaastaada caadiga sidii hore oo kale maalinta xigta.

Marnaba ha labanlaaban qiyaastaada dawada si aad uga soo kabato qaadasho kiniin ku seegtay.

Haddii aad qaadato Xarelto xad dhaaf ah

La xiriir isla markaaba dhakhtarkaaga haddii qaadatay kiino aad u badan. Halista dhiigbaxa ayaa sii koradha haddii aad qaadato inaad aad u badan oo Xarelto ah.

Saamaynta soo raacda ah ee suurtagalka ah

Dhammaan dawooyinka waxay sababi karaan saamayn soo raac ah, inkasta oo ayna dhammaan isticmaalayaasha saamayn. Kala xiriir rugtaada caafimaad wixii talo ah haddii aad isku aragto wax dhiig oo ka soo baxa meelaha ay ka midka yihiin sankaa, afkaaaga, marinkaaga kaadida ama marinkaaga xiidmaha. Raadso daryeel degdeg ha (imerjansi) haddii aad isku aragto dhiigbax culus ama dhiigbax aan iskeed u joogsan. Haddii aad isku aragto ku dhufasho badan oo caloosha, xabadka ama madaxa ah, waa inaad sidoo kale raadsataa daryeel degdeg ah si loo hubiyo inaad lahayn dhiigbax gudaha ah. Sidoo kale raadso daryeel degdeg ah haddii aad isku aragto diciifnimo, daal, doorsoon maqaar, dawakhaad, madax xanuun, barar aan la garanayn sababta, neefta oo ku qabata, xabad ama laab xanuun aan caadi ahayn, astaamahaas oo u noqon kara calaamado dhiigbaxa.

Is-dhexgalka dawooyinka kale

Ha qaadan dawooyinka kale ee lidka ku ah caabuqa sida Voltaren, Naproxen ama asbiriin adiga oo aan marka hore weyddiin dhakhtarkaaga. Waxa laga yaaba inaad Xarelto la qaadan karto dawooyinka xanuunka ee leh paracetamol (acetaminophen) sida Alvedon ama Panodil. Waa muhiim inaad dhakhtarkaaga u sheegto dawooyinka kale ee aad qaadato, oo ay ka midka yihiin dawooyinka dukaanka laga iibso iyo dawooyinka walaxaha dhirta ka samaysan. Dhakhtarkaaga ayaa go'aamin doonaa daryeelka la tilmaamay.

Xaddidaadka

La xiriir dhakhtarkaaga kahor inta aadan qaadan Xarelto haddii:

- ◆ aad alerji (xasaasiyad daran) aad ku leedahay rivaroxaban ama wax kale oo ku jira Xarelto
- ◆ aad leedahay dhiigbax badan ama dhiig kaa socodo
- ◆ aad qabto cudur beerka ah oo halis kaaga dhigaya inaad yeelato dhigbax koradhsan
- ◆ aad uur leedahay ama ilmo nuujis aad tahay

Sidoo kale la xiriir dhakhtarkaaga haddii ay qorshaha kuugu jirto inaad uur yeelato.

Qalliinka, cad ka goynta baarista ama habraac caafimaadka ilkaha ah oo lagu talagalo

Haddii laguugu samayn doono qalliin, cad ka goyn baaritaan ama habraac caafimaad ilkaha ah sida ilig ka saarka oo lagu talagalo, waa inaad la xiriirtaa oo aad u wargalisaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarkaaga ilkaha inaad qaadato Xarelto.

Baaritaan caadiga ah ee dhiigga looma baahna

Saamynat Xarelto aad ugmakal kala duwana shaqsiyaadka. Xarelto waa in lal qaataa cuntada si loo hubiyo si fiican u dhaafka dawada, laakiin looma baahna cunto ama arrimo iskugu hagaajin gaar ah. Sidaas darteed uma baahnid baaritaan dhiig oo joogto ah si loola socdo saamaynta. Adiga oo u qaadta Xarelto sida laguugu soo qoray maalin kasta waa inaad la hesho waxtarka dawada.

Kaarka macluumaadka loogu taalagay badbaadada

Waxaad ka heli doontaa kaar dhakhtarkaaga ama kalkaaliyaha oo wata macluumaad ku saabsan ku dawayntaada Xarelto. Waa inaad kastaad soo qadataa kaarkaaga markaas ay booqaneysay ama dawayn aad ka heleysa, dhakhtar, dhakhtarka ilkaha ama daryeel bixiye kale.

Wax su'aalo ah oo ku saabsan Xarelto ma qabtaa?

Kala hadal dhakhtarkaaga ama kalkaaliyaha caafimaad ee rugta caafimaad ee maaraynaysa dawayntaada.

Si aad u hesho macluumaadka oo dhammaystiran, fadlan fiiri qoraalka yar ee ku lifaaqan.

Ma rabtaa xusuusin maalinle ah oo lagu helo farriin tekist ahaan. Iska diiwaangali halkan www.xarelto-patient.se

Fadlanxusuusnow la soco in adeeggaan uu yahay Af-Iswidhish.

Xarelto (rivaroxaban), antitrombotiskt medel, R (B01 AF01). Tabletter 15 mg, 20 mg, 10 mg (F). **Indikation:** Behandling av djup ventrombos (DVT) och behandling av lungemboli (LE), och förebyggande av återkommande DVT och LE hos vuxna. **Dosering:** rekommenderad dos för initial behandling av akut DVT eller LE är 15 mg två gånger dagligen under de första tre veckorna, följt av 20 mg en gång dagligen för fortsatt behandling och förebyggande av återkommande DVT och LE. Patienter med måttligt (kreatininclearance 30–49 ml/min) eller svårt (kreatininclearance 15–29 ml/min) nedsatt njurfunktion ska behandlas med 15 mg två gånger dagligen under de första tre veckorna. Därefter är den rekommenderade dosen 20 mg en gång dagligen. En sänkning av dosen från 20 mg en gång dagligen till 15 mg en gång dagligen bör övervägas om patientens risk för blödning bedöms överstiga risken för återkommande DVT och LE. När förlängd profylax av återkommande DVT och LE är indicerat (efter att minst 6 månaders behandling av DVT eller LE har avslutats) är rekommenderad dos 10 mg en gång dagligen. Hos patienter som anses ha hög risk för DVT eller LE, såsom dem med komplicerade komorbiditeter, eller som har utvecklat återkommande DVT eller LE på förlängd profylax med Xarelto 10 mg en gång dagligen, ska Xarelto 20 mg en gång dagligen övervägas. **Kontraindikationer:** Aktiv, kliniskt signifikant blödning. Organskada eller tillstånd, som anses utgöra en ökad risk för större blödning. Samti-

dig behandling med andra antikoagulantia, förutom vid byte av behandling till eller från rivaroxaban eller när UFH ges i doser som krävs för att hålla en central ven- eller artärkateter öppen. Leversjukdom förknippade med koagulopati och kliniskt relevant blödningsrisk inklusive cirrotiska patienter med Child Pugh B och C. Graviditet och amning. **Varningar och försiktighet:** Xarelto ska användas med försiktighet hos patienter med kreatininclearance 15–29 ml/min. Användning av Xarelto hos patienter med kreatininclearance < 15 ml/min rekommenderas inte. Om blödning inte kan kontrolleras kan antingen tillförsel av ett specifikt medel för reversering av faktor Xa-hämmare (andexanet alfa), som motverkar den farmakologiska effekten av rivaroxaban, eller ett specifikt prokoagulant medel, såsom protrombinkomplexkoncentrat (PCC), aktiverat protrombinkomplexkoncentrat (APCC) eller rekombinant faktor VIIa (r-FVIIa), övervägas. För patienter med tidigare trombos och antifosfolipidsyndrom rekommenderas inte Xarelto. Datum för senaste översynen av produktresumén oktober 2019. Bayer AB. Box 606. 169 26 Solna. Tel. 08-580 223 00. För ytterligare information samt priser se www.fass.se. Före förskrivning vänligen läs produktresumén på fass.se.

▼ Detta läkemedel är föremål för utökad övervakning. Hälso- och sjukvårdspersonal uppmanas att rapportera varje misstänkt biverkning till Läkemedelsverket.

Översättningen är utförd av *TransPerfect Translations AB*, ett professionellt ISO 9001:2008-certifierat översättningsföretag med kompetens att översätta från engelska till somaliska. Vi intygar härmed att denna översättning, enligt vår professionella kunskap, motsvarar dokumentet *Patientbroschyr (VTE) på engelska*.



Bayer AB
Box 606, 169 26 Solna
Tel: 08-580 223 00